



Saxartirka Dhismaha Dugsiga: Xisaabtan, daahfur iyo ka qayb qaadashada dadwaynaha

Fall 2012

Yaa eegaya meel marinta sanadka dhismaha dugsiga? PPS waxay saas xidhay gudi muwaadiniin ah oo eega misaanayada iyo mashruuca barnaamijyada dhismaha dugsiga iyadii oo lagu dari doono shakhsiyaad isku dhafan si loo ilaaliyo sumcadda bulshada islamarkaana loom eel mariyo cadaalada iyoxisaabtan.

- Inta badan gudigu waxa ay noqon doonaan isku dhaf khibrado kala duwan leh sida qaabaynta; dhismaha; dhaqaalaha dhismaha; caqdiyada guud; dhaqaalayahan, iyo/ama xisaabi xil ma leh.m

Xubnaha gudiga waxaa magacaabi doona Gudiga Dugsiyada Guud ee Portland iyadii oo oo dib loo eegayo islamarkaana la farfiqayo miisaaniyada iyo gegtirka jadwalka iyo sidoo kale tixgelinta wixii kale ee soo kordha inta lagu jiro barnaamijka.

- Gudigu waxa ay raaci doonaan nidaamka PPS ee Long Range Facilities Plan (LRFP). LRFP waxaa qaabeeyey 39 aqoon yahan, xubno bulshada ka socday, howlwadeenada degmada iyo dadaalo lagu doonayey misaanayad xalaal ah, iyo iyadii oo si mas'uuliyadi ku jirto loo adeegsado, marka taa lagu daro warbixin xaga xisaabtanka dhaqaalaha ah ee dayactirka dhismayaasha dugsiyada.

Sidee ayeey qaabaynta dugsiyada iyo dhismuhu ola saan qaadayaan baahida barashada? The Long Range Facilities Plan ayaa ku talisay dayactirka iyo dib u qaabaynta dugsiyada si loo gaadho bii'ad barasho oo habban iyo barnaamijyada waxbarashada ee la higsanayo.

- Dugsiyada waxaa loo dayactiri doonaa iyadii oo loo eegayo hadba sida ay fasaladu u shaqaynayaan, sida masaaxada dugsiyada looga faa'iidaysto, iyo hagaajinta, qaabaynta sida ugu wanaagsan ugu adeegaya barashada.
- Ardayda, macalimiinta, waalidiinta, hogaanka dhaqaalaha, xubnaha bulshada iyo khubaro maxali ah ayaa ka qayb qadan doona qaabaynta si loo hal-abuuro xarun dhexe ee barashada, hagaha aragtida barashada ee barashada casriga ah tan la saan qaadi karta baahida ardayda, qaabka barashada iyo dariiqadaha daraasada.
- Howlahani waxa ay bilaaban doonaa deyr 2012 iyadii oo laga wada qayb qaadanayo xagga aragtida mustaqbalka dhismayaasha dugsiyada PPS tan dhiiri gelinaysa danaynta iyo najaxa dhaaman ardayda oo dhan, sara-dhigaysa oo caawinaysa barashada iyo baraida, islamarkaana u bedelaya aragtidaa heerka iyo tilmaamaha la bixiyey.

Saamayn intee la eg ayeey bulshadu ku leedahay qaabaynta iyo dayactirka dugsiyada? Kooxda Ka talo bixinta Qaabaynta - waa ay ku kala duwan yihiin dugsiyada bulshadu - waxa ay yeelan doonaan talo bixin dib u habayn walba, dib u dhis dhamaystiran ama mashaaruuca bedelida dugsiga oo dhan.

- Ka taliyayaal walba oo xagga qaaybta waxaa qayb ahaan ka mid noqon doona, macalimiin, arday, waalidiin, deriska, hogaanka bulshada ee xaga ganacsiga iyo cidii kale ee danaynaysa. Kooxdu waa ay la shaqayn doonaan howlwadeenada degmada iyo qaabeeyayaasha mashruuca iyaga oo ka qayb qadan doona howlaha qaabaynta, marka lagu daro howlmaalmeedyada ay dugsiyada bulshadu u dhan yihiin. Kooxdu waxa ay sidoo kale la shaqaynaysaa howlwadeenada degmada xafladaha dhagax dhiga iyo xadhig gooynta.

Sidee ayeey ardaydu oga qayb qaadan karaan islamarkaana oga baran karaan mashaaricda dhismaha dugsiga? The Long Range Facilities Plan waxa ay ku talisay in ardayda dhiganaya dugsiyada dayactirka buuxa lagu samaynayo ay ka qayb qaataan qorshaha shaqada iyadii oo loo sii marayo manhajka, tababarada, marugelin shaqo, bandhigyada shaqada, cilmi baadhis, iyo bandhiga mashaaricda.

- Illaalaeynta qorshaha la hindisay iyo wada shaqaynta qaabaynta, horumarinta, joogtaynta bulshada iyo ardayda, macalimiinta iyo howlwadeenada degmada.
- Gudiga dugsiyadu waxa ay qabatimeen "Equity in Public Purchasing and Contracting" oo isagu ka kooban barashada shaqada ee ardayda. PPS waxa ay ardayda ka qayb gelinaysaa noocyo kala duwan oo qorshaynta, qaabaynta iyo dib-u-dhiska

Waa sidee qiyaasta sanadka ee imika sidee ayeeyse u saamaynaysaa milkiilayaasha aqalada? Celceliska guud dugsiyada PPS waa 65 jir. Qiyaasta Codaynta 26-144, \$482 ee lagu taliyey eed sanadka dhismayaasha dugsiyadda, ayaa ah wejiga hore ee qorshaha dadaalka lagu doonayo bedelka iyo dib-u-dhiska dugsiyadda PPS. In la dayactiro ama la bedelo dhamaan dugsiyadda waxa ay u baahan tahay cod laba-galle ah oo lagu ansixiyo sanadada sadano dhowr ah. Qiyaasta 26-144 ayaa noqon doonta; Bedelida saqafka dugsiyada da'aya, wax noqday ama itaalka daran ;Dayactirka dugiyada sare ee Franklin, Grant and Roosevelt, iyo beelida dugsiga Faubion PreK-8. (waxay sidoo kale horudhac u tahay qorshaynta dayactirka dhamaan dugsiyada sare sanadaha soo socda.) ;Tayeynta dugsiyada tan la xidhiidha dhulgariiradda.;Dib u celinta amahda dhaqaalihii saqafka lagaga bedelay 9 dugsiga, bedelida 47 diiriye, iyo dugsiga Rosa Parks;Kordhinta fursad u helida ardayda dugsiga, macalimiinta iyo martida iyo inta itaalka daran.;Dayactirka fasalada sayniska ee dugsiyada dhexe. Kharashaadka ku baxaya dhismayaasha dugsiyada lagu taliyey iyo sanadkooda sideeda sano ee ug uhoraysa ayaa lagu qiyaasay \$1.10 \$1000 kiiba ee qiimaha milkiilaha – iyadda oo hoos u dhigaysa qiyaasta 30 cents \$1000 kiiba ee 12 sanadood oo dheeri ah. Qiyaastan, kharashka aqaladii lagu qiimeeyey \$150.000 iyadii oo ujeedadu tahay canshuurta hantidaa waxa ay noqonaysaa qiyaas ahaa \$165 sanadkii sided sanadood, kadib waxa ay hoos ugu dhacaysaa \$45 sanadkii 12ka sanadood ee hadhay.